Somali Cultural Center
Darul Quba
Masjid, Madrasa, Library
1511 4th Street, Minneapolis, MN 55454
P. O. Box 583472 Minneapolis, MN 55458
Tel: (612) 332-0104

CADADADKAN IYO KUWII KA HOREEYEYBA KA AKHRISO **www.shaaficiyah.com**

**February 2, 2007**
**Volume 2, Issue4**

# Lamahuraan

## *Beri samaadkii Maxaynu uga baydhnay?*

*Lamahuraan wuxuu ka turjumayaa dhab ahaan wixii tegey iyo turjumaada khaldan ee laga bixiyey Diintan aynu aaminsanahay.*

*Wuxuu baraarujinayaa inta caqliga wax ku miisaanta si ay bal isbarbardhig ugu sameeyaan waxa loo sheegayo iyo waxa saxda ah ee kutubta ku qoran.*

*Tusmada joornaalka*

| | |
|---|---|
| Berisamaadkii | 1 |
| Berisamaadkii | 2 |
| Kalabax | 3 |
| Wahaabiya | 4 |
| Wahaabiya | 5 |
| Culumada | 6 |
| Ma ogtahay | 7 |
| Adeegga | 8 |

Wuxuu soo bixidoonaa JIMCAHA u horeeya BIL walba.

**XUSUUSNOW!**
**HA IGU TUURIN QASHINKA AAYADO QUR'AAN AH AYAA IGU QORANE!**

## MOWLIIDKA NEBIGA (csw)

Maxay Diinta Islaamu kaqabtaa xaflad loo sameeyo dhalashada Nabiga(csw)

Imaam Sayuudi wuxuu ku yiri kitaabkiisa (Al-xaawi lil-fataawaa; Mujalladka 1aad, Baalka 189): Mowliidka Nebiga(scw) ayaa su'aalo la iska waydiiyay ma banaan yahay oo wax la mahadshay ma yahay mise waa wax aan la mahadin? qofkii sameeyana wax abaal maris ah maka helayaa?

Jawaabtayduna waa in asalka falka Mowlidka uu yahay dadka oo kulma oo la akhriyo Aayado Quraanka ka mid ah, lana sheego akhbaarta ku saabsan Siirada Nebiga(scw) iyo billowga dacwadiisi iyo Mucjisooyinkii la arkay kolkii uu dhashay, kadibna dadka cunto la siiyo intaa kadibna ay kala tagaan ayada oo aan waxyaabo kale lagu darin intaas. Falkaasi waa fiicanyahay, qofkii sidaa yeelana waa laga abaal marinayaa, maxaa yeelay Qaderka Nebiga(csw) ayuu weyneeyay, farxad iyo bishaarana wuu muujiyay Mowlidkii Nebiga(csw).

Qofkii ugu horreeyay ee sidaa yeelana wuxuu ahaa Boqorkii Arbil ee loo yaqiin al-Mudhafar Abu Siciid Al-kokbari, wuxuuna ahaa Boqor leh acmaal farabadan oo fiican, wuxuuna dhisay Masjidka ku yaalla buurta Qasyuun dusheeda (waa jabal ku yaalla Magaalada Dimishiq ee dalka Suuriya).

Wuxuu yiri Ibn Kathiir (Kitaabkiisa Al-bidaaya wan-nihaaya, juska 3aad, baalka 136): "Boqorkaasi wuxuu samayn jiray xafalad Mowlidka bisha Rabiicul-awal, wuxuuna u dabbaaldegi jiray si layaab leh, wuxuuna ahaa Boqor deeqsi ah oo geesi ah".Imaam Sayuudi wuxuu yiri: (Al-xaawi lil-fataawaa, juska 1aad, bogga 190): "Waxaa kitaab Mowlidka ku saabsan qoray Caalimkii Ibn Dixyah, wuxuuna ku magacaabay "At-tanwiiro fil mowlid al-bashiiri an-nadiiri) kolkaas baa boqorku (Al-Mudhafar) ugu abaalguday Kun diinaar. Boqorkaasina muddo dheer ayuu dalkaa xukumayay wuxuuna ku dhintay asiga oo la jihaadaya Gaalada magaalada Caka (ee dalka Falastiin) sanadkii 630H asiga oo taariikh fiican iyo magac fiican ka tegay. .Imaam Sayuudi wuxuu yiri: "Waxaa asal fiican Mowliidka uga helay sharciga xaafidkii Axmad bin Xajar ahaa, Aniguna (Sayuudi) asal kale oo labaad ayaan ka helay sharciga in Mowliidku uu yahay wax wanaagsan oo la dhigi karo.

**Kolka halkaa waxaa ka cad in Mowlidka Nabigu(csw) uu sunno wanaagsan yahay oo uusan ahayn bidco sida dadka qaarkood leeyihiin.**

Walaalayaal indhaha ha istirina oo dad aan waxba baarin oo wax lagu shubtay ha noqonani. Maxaa maanta aynu joogno oo Muslimiintu yihiin 1 bilyan iyo Badh ay uga sameeyaan Mowliidka meel walba ay joogaan marka laga reebo Boqortooyada Wahaabiyada ah ee Sacuudiga?. Xattaa Boqortooyada dhexdeeda ayaa dadku si qarsoodi ah u sameystaan iyagoo og in madaxa laga goynayo haddii lagu helo. Waxaa dhowaantan ka cararay Boqortooyada Wahaabiyada Imaamkii Xaramka ee Sh. **C/RAHMAN SUDEYSI** kadib markii uu ka muxaadareeyey in Mowliidka Nebugu(csw) uu banana yahay. Waxaa kaloo sidaas oo kale horey uga cararay dad badan oo uu ka mid ahaa Wasiirkii Batroolka ee Boqortooyada Sucuudiga **MOHAMED ZAKI Al-YAMANI** kadib markii ay Ibn Baz iyo Cutheymiin ugu soo galeen isagoo Mowliidka gurigiisa ku dhiganaya!.



Haddaba waxa aad qaybaha danbe ee joornaalka ku arki doontaan sababta ay Wahaabiyadu u diideen Mowliidka iyo cidda ka danbeysa diididiisa. Waxaa la yaab leh sida ay Wahaabiyadu ugu dikriyaan wax aan ka ahayn QURAANKA IYO SUNAHA ma ogolin. WAXAASI WAA BIDCO! WAAYO RASUULKU MA SAMEYN! WAXAASI WAA BIDCO WAAYO ASXAABTII MA SAMEYN!. La ogaa Quraafaadka aad dadka ku beer la xawsataan waayo waxaa lasoo ogaaday oo maanta dadkii Soomaaliyeed sida dharaarta ugu muuqday DADKA DIIDEY EE KU BEEN ABUURTAY RASUULKA(csw) IYO ASXAABTIISII SUUBANEYD. Anigoo soo gaabinaya ayaan odhanayaa WAA SHEEKHYADA AY WAHAABIYADU U YAQAANIIN SHIIKUL ISLAAM EE ISBAARADA U DHIGTAY WIXII AY SAMEYN JIREEN ASXAABTII, MUXAFIDIINTII, IMAAMYADII iyo Wixii uusan SUUBANAHU ka celin Asxaabta ee uu arkayey iyagoo sameynaya. Sida aad ka arki doontaan bogagga danbe, Sheekhyada ugu waayey ee aasaasay Wahaabiyada oo kala ah Ibnu Taymiya iyo Mohamed Bin C/Wahaab xataa waxay qoreen in MOWLIIDKU UU WANAAGSAN YAHAY IN LA DHIGO, OO KHEYR LAGA HELAYO! Xageed tiigsaneysaan Wahaabiyooy haddiiba kuwii idiin sameeyey Firqadan fasahaadka, dilka, dhaca, gaaleysiinta iyo xasuuqa ku haysay Muslimiinta Qarniyo dhan ayba fikradahoodu sida luubaanka iska daba iyo hor imanayaan. Wixii Baadhil ah oo aan sharci ahayna sidaasaa lagu yaqaan. Maanta si wax u sheeg, saa danbana si kale! Subxaanka!



Ninka isagu isku magacaabay Shiikh ee Isbaarada u dhigtey Axaadiistii wada saxiixa ahaa ee BUKHAARI IYO MUSLIM IYO UMUHAATU SITTA ayaa isagana ka mid ah dadka Muslimka waalay. Ninkan la yiraahdo SH. ALBAANI ayaa waxaa kutubtiisa iska hor imanaysa ay Wahaabiyadu soo daliishadaan markii la doonayo in Xadiis ka sheekeynaya Tawasul, Qabriyada, Roobdoonka, Dikriga iwm oo ku jira Bukhaari la daciifiyo oo laga dhigo waxaan la daliishan Karin!. Shiikhan oo geeriyooday 1999 isagoo waddan walba oo Islaam ah laga soo ceyriyey xattaa Sucuudigii uu joogay laga eryey caqiida xumadiisa awgeed iyo cayda iyo aflagaadooyinka uu u geysanayo Asxaabtii Suubanaha(scw) ayaa wuxuu aflagaadadii u weyney u geystey Bukhaari iyo Suubanaha iyo dhamaan dadkii Saalixiinta ahaa ee wanwanaagsanaa. Albaani waa ninka yidhi Qabriga Suubanaha(csw) ha laga saaro Masaajidka! Waa maxay Qabriga masaajidka ku dhex jira kulahaa! Bukhaari wuxuu ahaa nin aan iimaan fiican lahayn buu yidhi haddiiba Axaadiistan quraafaadka ah ee Suufiyadu adeegsadaan uu kasoo buuxiyey Kitaabkiisa. Kitaabkiisa iyo kuwa la midka ahina sixid bay u baahan yihiin-Markaa isagaa saxay oo u sameystay Silsilatu Daciif iyo Silsilatu Saxiix! Subxaanka!.

**Tolow Maxey Wahaabiyadu** ka wadaan waxaanu raaceynaa oo keliya: "Sunaha,Quraanka; Sunaha, Quraanka; Sunaha, Quraanka?

Runtoodse ma tahay?

Markaa haddii aad aragtid Wahaabi ka warwareegaya acmaashii Tawasulka (sida, Illaahoow Rasuulka fadligiisa waxaa igu sii ama Jaaha Rasuulka…), tawasulkaasoo ay sameyn jireen Asxaabtii Rasuulka, Taabiciyiintii iyo dhamaan Culumadii Islaamka ee hore iyo kuwa maantaba wuxuu Wahaabigu soo daliishanayaa AXAADIISTAAS WAXAA DACIIFIYEY ALBAANI!. Ma fahantay walaal! Sunnada iyo Kitaabka ayaanu raacaynaa ujeedadeedu waa Culumadaas fasahaadka keentay ee Wahaabiyada ayaanu ku kala baxaynaa weeye ee maaha Imaamyadii, Asxaabtii, Taabiciyiintii iyo sidii ay diinta u fahmeen ee waa sida ay Wahaabiyadu diinta u bedeshay ee ay wax u qoreen!

# Kala bax Kitaabkaa qaba!

Weligaa ma u fiirsatay nin Salafi(wahaabi) ah oo Axaadiis ama Aayado Qur'aan fasiraya? Haddii aadan weli hoos usii eegin bal haatanba bilow inuu wuxuu sheegayo yihiin wax sax ah ama inuu marba usha meel ku dhufanayo!
Haddii aan u weecdo Xagga Axaadiista bal ila eeg: Waxaa Diinka noo soo xifdiyey dadyow daacad ahaa oo naftooda, maalkooda iyo waqtigoodaba usoo hurey sidii ay xaraf kasta oo uu Suubanuhu(csw) yidhi loo xifdin lahaa, loo raadin lahaa, loona ururin lahaa.

Dadkaas waxaa ka mid ahaa Bukhaari iyo Muslim iyo Weliba Muxadisiinta kale ee ururiyey Kutubta loo yaqaan Umuhaatu Sitta. Waxaa kaloo ka mid ahaa dadka abaalka ugalay Ummadan 4-ta Imaam ee maanta la haysto 4-tooda Madhab oo iyagu wixii ku saabsan Shareecada Islaamka iyo Fiqiga noo soo ururiyey.
Haddaba bal ila eeg sida ay Wahaabiyadu u bedeleen Diinteenii iyo sida ay dadka uga dhaadhiciyeen in sida ay Culumadoodu(Albaani, Cutheymiin, Ibn Baz, Al-Jazairi, Mohamed Bin C/Wahab, Ibnu Taymiya) wax u fasireen ay sax tahay oo Culumadii ka horeysey iyaga iyo Saxaabadiiba ay ugu magacaabeen dad aan caqiido badan lahayn! Adiguba ka bogo!

| المرجع المسمى | الوهابية | الدليل | أهل الحق يقولون | الموضوع |
|---|---|---|---|---|
| " الكتاب المُسمى التوحيد " لإبن فوزان ، ص/120 ، الرياض ، وكتاب " بحث أسبوع الشيخ محمد بن عبد الوهاب " . | الوهابية يقولون يحرم الاحتفال بهذه المناسبات مع أنهم يحتفلون بانطلاقة دعوة مؤسس الوهابية محمد ابن عبد الوهاب لمدة اسبوع | ليس في ذلك مخالفة للشرع ولم يأت نص يحرِّم ذلك ، وإنما هو من باب السنة الحسنة | لا بأس بالاحتفال بهذه المناسبات | الاحتفال بمناسبة ذكرى الإسراء والمعراج والهجرة النبوية وغيرها |
| ، "كتابه : " التوحيد ، ص/115 ، الرياض السعودية . انظر " كتابهم المُسمى التحذير من البدع" ص/5 | قال ابن فوزان أحد " : زعماء الوهابية يحتفل جهلة المسلمين أو العلماء المضلين بمناسبة مولد الرسول وقال ابن باز إن " الاحتفال بمولد النبي فيه تشبيه باليهود . | اجتماع المسلمين وعلمائهم من أهل الحديث والفقه والتفسير على الاحتفال بمولد النبي صلّى الله عليه وسلّم . | المسلمون وعلماؤهم يحتفلون بهذه المناسبة ، منذ حوالي 900 سنة التنوير في مولد البشير النذير ( ابن دِحية ) . | الاحتفال بمولد النبي صلّى الله عليه وسلّم |

Waa is barbardhig cadeynaya waxa ay Ijmaaca Culumada Adduunku ka qabaan Mowlidka iyo Xuska iyo waxa ay daliishanayaan iyo sida ay Wahaabiyadu u aragto iyo kutubtey kaga hadleen. Sida kor ku xusan Ibnu Fowzeen ayaa wuxuu leeyahay in Culumada Islaamku ay Jaahil ahaayeen oo ay lunsanaayeen, Xuska Mowliidkanu uu yahay wax looga dayday Yuhuuda! Subxaanka Cilmi yaraa! Ka sii akhri boggaga soo socda isbarbardhigan oo dhinacya badan taabanaya.